

## Talaalka Hepatitis B

Talaalku ama "iraabku" waxa weeye sida ugu wanaagsan ee loogaga hor tegi karo cudurada khatarta ah. Ururka National Advisory Committee on Immunization ayaa aaminsan in si joogto ah la isu talaalo.

### Cudurka keena

Cudurka keena hepatitis B-gu wuxuu si aan looga bogsan karin u dhaawici karaa beerka. Waxa weeye waxa ugu weyn ee keena kansarka ku dhaca beerka. Beerku wuxuu ridqaa cuntada qashinkana dibada ayuu jidhka uga saaraa.

Waxa gobolka Ontario lagu arkaa sanadkiiba ilaa 150 qof oo qaba cudurka hepatitis B. Dadka cudurka qabaa badi waxa lagu gartaa in ay daalaan, xumad yeeshaan, cuntada ka tagaan, mararka qaarkoodna midabka jidhkooda iyo indhahoodu uu noqdo jaale (waxa loo yaqaanaa jaundice).

Laga yaabaa in ay jiraan dad kale oo badan oo qaba hepatitis B. Adiga oo qaba ayaan ogaan karin. Tan macneheedu waxa weeye qof kale ayaad qaad-siin kartaa adiga oo aan ka war qabin.

### Maxaa laga qaadaa hepatitis B-ga

Hepatitis B-ga waxaa laga qaadaa dhiiga iyo dheecaamada kale ee qofka qaba. Gaar ahaan waxa weeye cudur laga qaada galmada, waxa kale oo laga qaadi karaa irbado hore loo isticmaalay, iyo qalabka jidhka/dhegaha lagu duro ama qalab wasakh ah oo taatuu lagu sameeyey.

Hooyada qabtaa waxay u gubin kartaa ilmaheeda marka uu dhalanayo. Hepatitis B kama qaadi kartid qof qufaciisa ama qof aad laabta-laabta u saar-tay ama aad la isticmaashay weel wax lagu cuno.

### Daawo ma leeyahay?

Daawo malaha hepatitis B-gu. Badi dadku way ka bogsadaan, laakiin boqolkiiba 10 ayaa cudurka sita noloshooda oo dhan dadka kale-na qaad siiya. Dadka qaarkood beerka ayaa xanuuna inta noloshooda ka hadhay.

### Ka hortag ayaa jira

Hepatitis B-ga waxa laga-ga hor tegi karaa talaalo taxane ah.

### Talaalka dhibaato ma lagala kulmaa?

Talaalku dhibaato ma laha. Waxa Canada laga isticmaalayey sannado badan waana talaalada ugu dhibaataada yar ee jira. Laga yaabaa inuu la yimaado dhibaatooyin yar-yar oo aad u sahlanaa laga yaabaa meesha oo casaata, meesha irbada lagaga muday oo diirta ama bararta, laga yaabaa daaliin yar inuu yimaado ama xumad yar oo maalin ama wax la mid ah la lahaado.

Dhibaatooyinka intan ka badan ee 15 maalmood guda-hood ka iman kara waa inaad la socod siiso dhakhtarkaaga ama rugtaada caafimaadka. Kuwan waxa ka mid ah neef qabasho, wejiga iyo afka oo barara, xumad sare u dhaafta 39 C, caarada ama xasaasiyada.

Khatarta ka iman karta hepatitis B ayaa ka badan ta ka iman karta talaalka, hase-yeeshee, dadka qaar waa in aanay talaalkan qaadan.

Lagu talaali maayo haddii ay xumadi ku hayso ama aad qabtid cudur ka badan hargab khafiif ah. U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad xasaasiyad ka qaaday talaal hore. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'iidooyinka talaalkasta.**

## **Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka?**

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

## **Diiwaan gelinta talaalada**

Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku "kaadhka jaalaha" ah ku diiwaan geliyo talaalka. Meel adag dhig.